Habilitering & Hälsa
REGION STOCKHOLM

# Kani waa cudurka aawtisimka

**Cinwaanka orejinaalka: Det här är autism**

**Qoraa: Eric Zander**

**Tarjumidda: Semantix**

Cudurka nafsaaniga ah ee aawtisimka (autism) waa cudur cuuriyaannimo. Qofka qaba aatisimka waxaa ku adag la tacaamulka dadka kale iyo xiriir lala yeesho dadka kale iyo waliba qaabab xaddidan oo ah xagga dhaqanka iyo dabeecadda, waxyaabaha uu xiiseynayo iyo howlaha uu sameynayaba ah.

Aawtism wuxuu badanaa qeyb ka yahay naafo/cuuriyaanimo ama cudurro kale, sida adhd (cudur oo uu qofka rabo inuu maantoo dhan wax sameeyo), luqqadda oo qofka ku adag, naafo xagga maanka ah iyo suuxid. Badanaa dadka qaba aawtism waxey leeyihiin waxyaabo ey aad ugu fiican yihiin oo ilaahey ku mannadeystay, laakiin heerar kala duwan ayey leeyihiin oo xattaa ey jiraan kuwo cuuriyaanimo xagga maskaxda ah qaba. Dad yar oo ka mid ah dadka qaba aawtism ayaan heysan awood hormarin oo xagga luqadda ah ama wax yar ayey hadli karaa, halka qaarkoodna ey korriinkooda hadalka uu yahay inta laga sugo da’da ey jiraan dadka jira oo kale ama iney leeyihiin hormarin baaxad weyn oo xagga ku hadalka luqadda ah.

## Aawtism iyo sharraxaadaha kala duwan ee sugiddiisa

Waxaa jira labo sharraxaad oo caalami ah oo ku saabsan sugidda cudurka kuwaasoo lagu qeexo qeybaha kala duwan aawtisimka. Mid waa qeexidda mareekanka ah ee DSM-5, tan kale na waa ururka qeexidda ururka caafimaadka adduunka ee ICD-10.

I DSM-5 wuxuu leeyahay oraahda autism spectrum disorder (ASD) labadii qeexid ee hore ee DSM-IV-TR: autistiskt syndrom, Aspergers syndrom iyo dhibaato baaxad weyn oo xagga korriinka dhimirka ah oo aan faahfaahsaneyn. Qeybta iswiidhishka ah ee DSM-5, Mini-D-5, waxaa oraahda autism spectrum disorder loo turjumay aawtism. Waxaa caadi ah in la isticmaalo ereyga lasoo gaabiyay ee ASD badalka aawtism xattaa markaask u dheheysid luqadda iswiidhishka.

Waddanka Iswiidhan marka la xaqiijiyo cudurka aawtisimka waxaa badanaa la isticmaalaa qiimooyin lagu saleeyo oo ka yimaado DSM-5. Laakiin xaqiijinta marka lagu dhigayo diiwaanka waxaa lagu qoraa qaabka ICD. Nuuca cusub ee ICD-10, waxaa ku jira magacyada sugidda cuurka ee la dhaho aawtisimka carruurta, Aspergers syndrom iyo atypisk autism. Sida ku xusan dokumentiyada lagu qoray nuuca cusub, ICD-11, waxey magacyadii hore ee cudurka leeskugu keeni doonaa hal magac sida DSM-5,magacaas oo ah: autism spectrum disorder. ICD-11 waxaa la qorsheynayaa in lasoo saaro gudaha sanadka 2018.

## Sidee ayuu u egyahay aawtisim?

Autism waa cuuriyaanimo la xiriirta korriinka. Waxey ka dhigantahay in da'da, heerka luqadda iyo hibo maskaxeedka ey saameynayaan sida uu aawtisimka u yahay dadyowga kala duwan ee uu ku dhaco. Astaamaha waxaa la arkaa waqtiga korriinka ama barbaarinta, laakiin haddii uu qofka heysto tababar iyo caawimaad waxaa loo fududeyn karaa qaar ka mid waxyaabaha ey ku adagtahay sameyntooda.

Aawtisimka waxey leedahay astaamahaan soo socda, sida uu sheegayo DSM-5:

- Qaladaad joogto ah oo xagga bulshada iyo la qabsigeeda xaga xiriirka.
- Dhaqan iyo falal xaddidan oo lagu celceliyo oo xagga dabeecadda, xiisaha iyo waxqabadka ah.

## Ciyaar wadaaga bulshada

Dhibaatqada xagga ciyaar wadaaga bulshada iyo xiriirka bulshadeed waxaa lagu arkaa ama lagu arkay qeybahan soo socda:

***Ciyaar wadaaga bulshada.*** Ciyaar wadaag bulsheed waxaa loola jeedaa in uu qofka wax la sameyn karo dad kale iyo inuu la qeybsan karo dareen iyo fikrado. Laga soo billaabo carruurta amrka ey jiraan da'da yar waxaa lagu arkaa kuwa qaba aawtisimka iney ilmaha yar eysan sameynin wax ciyaar wadaag ah ama wax yar ayey ka sameynayaan, dadka kale lama qeybsanayaan dareenkooda mana ku dayanayaan dadka kale waxey sameynayaan ama wax yar ayey ka sameynayaan. Carruurta hadasha waxey luqadda u isticmaalaan qaab hal dhinac o kaliya u janjeera, tusaale ahaan waxey shaagaan ama ey baryaan waxa ey rabaan, inta ey wadahadal sameyn lahaayeen oo dareenkooda dadka kale la qeybsan lahaayeen. Dadka waaweyn (ee qaba aawtisimka) waxaa ku adag iney wadahadal qof la billaabaan iyo amrka la billaabayo iyo mowduuca habboon in laga wadahadlo. Dadkaas waaweyn qaarkood waxey isticmaalaan istaraatiijiyo ey barteen iney isticmaalaan marka ey bulsho ku dhex jiraan, dadka kale si otomaatik ah ayey ula qabsadaan iyagoo ka qiyaas qaadanaya xaaladda si ey tahay. Taasi waxey qofka (qaba aawtisimka) ka qaadaneysaa enerji badan waxeyna keeni kartaa walwal.

***Xiriir aan wadahadal aheyn:*** Carruurta yaryar waxaa laga arki karaa ineysan isticmaaleyn xiriir indhaha ah, in eysan wax ku fiiqeynin, ama eysan soo qabaneynin waxyaabaha qaar si u muujiyaan wadaagid xiiseyn. Waxey tusineysaa in ilmaha yar eysan raaceyn meesha ey dadka ku fiiqayaan farta ama waxa ey fiirinayaan. Waxyaabahaas wey ayryihiin in laga arko waxeyna si lama filaan ah u isticmaalaan marka uu jiro wada xiriir ama maba sameeyaanba. Dadka waaweyn ee qaba (aawtisimka) isla markaana luqaddooda ey hormarsantahay lagama dareemo qaladaadka ah sida ey u isticmaalaan xiriirka indhaha iyo xiriirka kale e aan hadalka aheyn iyagoo hadalka lagu dubbaridayo.

***In la sameeyo, la xoojiyo isla markana la fahmo xiriirka la leeyahay dadka kale.*** Xiisaha bulshadeed waxuu ahaan karaan mid xaddidan ama mid meesha ka maqan. Ilmaha yaryar aad ayey uga muuqataa tusaale ahaan iney cayaareynin dheesha iska dhigidda oo eysan la ciyaarin dadka kale ama tiro yar ayaa sameeya. Ilmaha xoogaa weyn wey dhacdaa iney ilmaha kale la ciyaaraan, waa kaliya haddii raacaan sharciyo aad u go'aansan oo ku saabsan sida dheesha ey ahaaneyso. Dhalinyarada iyo dadka waaweyn waxey dhib ku qabaan iney fahmaan sida la ahaado marka xaalado kala duwan lagu suganyahay. Laga yaabaa iney rabaan iney iskood wax u sameystaan ama iney la socdaan dad aad uga yar ama uga weyn.

Dad badan ayaa waxey codsadaan iney heystaan saaxiibo iyaga oo aanan fahansaneyn waxa eey saaxiibtinimo ka dhigantahay iyo waxa la sameeyo si saaxiibtinimada loo sii wado.

## Dhaqan ama dabecad xaddidan

Rabitaanka ah in lasameeyo waxyaabo xaddidan ama waxyaabo isku mid ah oo soo noqnoqda waxaa lagu arkay ugu yaraan laba meelood oo kuwaan ka mid ah:

***Dabeecad ah in wax lagu celceliyo.*** Waxey ahaan kartaa in gacmaha ama faraha si aan caadi aheyn leesugu duuduubo, in si ku celcelis ah ooa isticmaalo waxyaabaha qaar sida (wiifinta, simidda) ama in luqadda loo isticmaalo si ku soo celcelis ah ama si aan sida caadiga ah aheyn (ereyada sida celceliska ah loo isticmaalo, jumlooyin ereyo ah ama sida loo dhahayo, in leesku qaldo magac u yaallada iyo ekolali, in lagu soo celiyo ereyada ugu dambeeyo ee uu qof kale dhaho).

***Waxyaabo sameyntooda uu qofka ku dhego iyo diidi xagga isbedelka ah:*** Dadka Aaawtisimka qaba qaarkood aad ayey u dhibtaa haddii wax yar xataa oo is bedel ah lagu sameeyo waxyaabaha ey u barteen ama haddii waxyaabo cusub la sameynayo. Waxey ahaan kartaa in waxyaabaha ey sameynayaan ey sida ey yihiin marka u sameeya iyagoo waqti ahaanna daqiiqadaha xataa ilaalinaya, iney u hadlaan ama u fikiraan si iney arkaan caabudid gudanaayaan oo kale iyaga oo laga yaabo wax yar ka bedela sida ey u sameeyaan, sida iney weydiiyaan hal su'aal oo lagu soo celceliyo iyadoo la ogyahay jawaabta.

***Ku howlnaanta iyo xiiseynta waxyaabo aan caadi aheyn oo ey juhdi aad ui badan geliyaan.*** Inta goor ey samynayaan ayaa qeyrul caadi ah laakiin xiisaha xattaa qeyrul caadi ayuu ahaan karaa. Cunug ayaa waxaa laga yaabaa inuu ka helo kursiga lagu fadhiisto ee musqulaha ama xaaqinka elektaroonigga ah laakiin waxuu kaloo ka heli karaa bahalladii qadiimigi ahaa ee dinosaariyaha iyo boqorrada ingiriiska, halka qofka weyna uu ka helo karo luqadaha ama jadwalka waqtiga.

***Ficil-celinno aan caadi aheyn ama xiiso xaga urinta, dareemidda aragga ama maqalka ah.*** Waxey ahaan karaan in si aan caadi aheyn wax loo uriyo ama loo taabto oo loo dareemo, in ey cajabiso oo ey ka helaan meelo birbirqaya ama wareegsanaya ama wax la mid ah. Qaarkood waxey xasaasi uga yihiin muujinta waxyaabaha maskaxda ka kiciya sida ficil ka celin ah in eysan rabin dhawaaqyada caadiga qaarkood ama iney aad u dhibsadaan qabowga ama inuuba waxba ka dhibin, sidoo kale kuleelka ama xanuunka. Ficil-celinta saan oo kale waxaa lagu saleeyaa cunto xaddin oo nuucyo gaar ah leh iyo cunto aan kuwa caadiga aheyn.

Dad waaweyn oo badan isla markaana heysta xariiftinimo aad u weyn iyo luqad hormarsan waxey bartaan iney qariyaan dabeecaddooda wax kusoo celceliska. Laakiin in ey heystaan wax ey ku takhasuseen waxey qaarkood siisaa farxad iyo fursado wanaagsan oo xagga waxbarashada iyo nololxirfadeedka ah. Waxaa caadi ah in kuwa aan xiiseynin waxyaabahaan marka ey yaryihiin ineysan xiiseynin xattaa marka ey weynaadaan.

## Dhibaatooyin kale oo la xiriira aaawtism

Aawtism wuxuu badanaa qeyb ka yahay naafo/cuuriyaanimo, cudurro dhimirk ah ama cudurro kale. Kuwaas oo saameeya sida uu aawtisimka noqonayo iyo caawimaadda uu qofka qaba u baahanyahay. Tusaale ahaan haddii ey jiraan cudrro kaloo wehliya.

- Dhibaato xagga korriinka dhimirka ah
- Dhibaato xagga luqadda ah

- Xaalado kaloo caafimaad (sida fragilt X-syndrom, tuberös skleros, neurofibromatos, suuxid)
- Wada shaqeynta dhaqdhaqaaqa jirka iyo maskaxda (katatoni)
- adhd, jirrada qasbidda (tvångssyndrom), buufiska ama welwelka iyo walbahaarka.

## Goormee la ogaan karaa aawtism?

Aawtism waxuu soo shaacbaxaa xilliga hore ee carruurnimada laakiin lama warhelo illaa waqti dambe. Si la hubo uma ogaan karno haddii u ilmo yar qabo aawtism illaa uu dhammeysanayo sanadka ugu horreeyo ee nolosha. Ilmo badan waxaa looga dareemaa inuu yaraado dhaqankooda bulsheed ama inuu noqdo mid ka duwan. Laakiin qaarkood lagama arko illaa ey gaaraan da'da iskoolka ama waqti intaas ka sii dheer illaa cudurka laga arkayo cuuriyaanimadana noqoneyso mid la arkayo. Qalabka maanta la isticmaalo ma suurto gelinayo in la sheego cudurka inta ka horreysa 18 bilood ee ugu horreyso nolosha. Wey jirtaa in dadka qaar lo sheego iney qabaan aawtism iyagoo waaweyn oo qaangaaray.

## Muxuu ku xiranyahay oo sababa aawtism?

Aawtism waxuu ku xiranyahay waxyaabo badan oo la ogyahay iyo kuwo badan oo aan la ogeyn. Kuwaasi waxey saameyn u geystaan maskaxda. Waxey saameeyaan qaabka ey maskaxda u qaaddo macluumaadyada kala duwan iyo tarjumaaddooda, waxaana loola jeedaa shaqooinka maskaxda ey qabtaan oo aan sidii la rabay u shaqeyn. Waana qaabka aan saxda aheyn ee uu jirka u turjumo waxey maskaxda rabto tan keeneysa dhibaato xagga la jaanqaadka bulshada ah iyo habdhaqanka xaddidan ee hadana lagu soo celceliyo.

Waxaa jira waxyaabo tusinaya in leeska dhaxlo aawtism laakiin waxaa kaloo jira iyagana in waxyaabo badan oo bii'ada la xiriira iney wax ka geystaan iney badato khatarta aawtism. Waxey ahaan karaan infekshinno, cudurro ama daawo la qaato waqtiga ey ilmaha uurka ku jiraan. Khatarta xattaa wey kordheysaa haddii hooyada ey gaarto dhibaato xagga sunta bii'ada ah iyo sunta looga hortago waxyaabaha dhibaatooyinka kala duwan geysta iyo waliba haddii waalidiinta da'dooda ey weyntahay.

## Waa sidee caadi ahaanshaha jiritaanka aawtism?

Sanadihii ugu dambeeyay waxaa batay dadka laga sheegay cudurka aawtism maantana dadka qaba 1–2 % dadka ku nool Iswiidhan. Sababha caadiga ah ee kororka ayaa ah in baaxadda calaamadaha lagu garto aawtism la kordhiyay taasna ey keentaay in dad ka badan dadkii hore ey jiraan, iyo in lagu fiicnaaday

helidda cudurka aawtisimka, laakiin leyskama indha tiri karo in aawtism uu caadi noqday oo uu soo batay. Wiilasha laga helay ayaa ka badan gabdhaha. Waxaana la hadal hayaa in sawirka xaqiiqda uu yahay inuu aawtism uu ku badanyahay wiilasha, ama in aawtism laga helo gabdhaha eysan u fududeyn sida wiilasha oo kale.

## Maxaa la sameyn karaa?

Waxyaabaha ugu wanaagsan ee waayadaan la sameyn karo waa la tacaalid xagga baridda ah iyo sida ugu wanaagsan ee wax loo bari karo dadka qaba aawtism. Wali ma jiraan daawooyin fiican oo ka hortaga cudurka aawtism. Yoolka laga leeyahay la tacaalidda waa in kor loo qaado tayada nolosha qofka iyo awood u yeelashada inuu kaligiis wax sameysto, iyadoo laga dhisayo meelaha uu ku liito qofka isla markaana la siinayo tababar iyo caawimaad. Bii'ad ey dadka ku sugan aqoon wanaagsan u leeyihiin aawtism iyo deegaan ku habboon aad ayey

muhiim u tahay. Baahida caawimo wey kala duwan yihiin hadba qofka uu yahay waana wax waana wax is bedelaya marxaladaha kala duwan ee nolosha. Asaaska waa in aawtism uu yahay cuuriyaanimo qofka inta uu noolyahay oo dhan jira iyo in qofka qaba aaawtism uu badanaa u baahan yahay caawimaad noloshiisa oo dhan ama qeybo ka mid ah.

## Baaritaan xagga helidda cudurka ah

Howlaha iyo caawimaadda la siiyo dadka qaba aawtism waa iney ku saleysan yihiin baahida gaarka ah ee uu qof walba qaba. Tan ugu horreyso waa in la xaqiijiyo jiridda cudurka. Maadaama ey jiraan farqiyo aad u weyn oo aawtisimka ah maku filna in la dhaho cudurka waa la helay oo kaliya. Si loo helo sharraxaad fiican oo ku saabsan caawimaadda uu qofka u baahan yahay waa in la helaa qiimeyn baaxad weyn oo ey ugu yaraan iska kaashadaan dhakhaatiir iyo dhakhtarka cilmu nafsiga, waana iney sameeyaan qiimeyn ku saabsan awoodda waxqabsi ee qofka. Qiimeyntaan oo ah mid qeyb walba taabaneysa waxuu ka koobanyahay korriinka maskaxda, maareynta shaqooyinka maalmaha ah, luqadda, la jaanqaadka dadka kale iyo tayada nolosha. Sharraxaaddaan iyo qiimeyntaan waxey hadhow saldhig u ahaan doonaan waxqabad ka turjumaya baahida qofka. Sharraxaaddaas waxey u baahantahay in daba gal lagu sameeyo hal ama dhowr jeer oo ah inta lagu jiro korriinka.

## Wax qabadyo hore

Waxaa loo arkaa iney aad muhiim u tahay helidda aawtisimka waqtiga ugu horreyo uga macquulsan maadaama ey jiraan caawimaad baaritaan oo sheegeysa in waxqabadyada la sameeyo waqtiyada ugu horreeyo ee aawtisimka in nafci laga helay. Waxaa waxaan jirin qaab helid wax ku ool ah, habase jiraane qaabab badan oo la isticmaalo si loo helo. Hababka maanta la isticmaalo si lo helo jiritaanka aawtism waa hal sano marka ey ilmaha dhashaan. Laakiin sida caadiga ah waa in la helo waqtiga ey ilmaha dhigtaan iskoolka xanaanada ama iskoolka caadiga ah. Ilmaha iskoolka dhigta ee qaba aawtism waxaa fiican in la siiyo tababar badan oo xagga xifdinta iyo barashada habdhaqanka, waana iney ku saleysan yihiin qiimeyn iyo baaritaanno xagga dabeecadda ah oo la sameeyay. Barnaamijyada saas oo kale ah waxey badanaa qaataan saacado badan maalintii. Carruur badan waxey faa'iido badan ka heli karaan barnaamijyo waqti badan aanan qaadaneyn ama waxqabad meelo kooban taabanaya, tusaale ahaan barnaamijyo caawimo oo xagga xiriirka ah iyo barnaamijyo dheelo iyo ciyaaro isugu jira. Xilliga iskoolka xanaanada waxqabadyadaas waxaa lagu sameeyaa guriga iyo iskoolka iyadoo ey iska kaashanayaan waalidiinta, iskoolka iyo goobta jimicsiga.

Ilmaha waaweyn, dhallinyarada iyo dadka waaweyn oo uu ku hadalkooda luqadda fiicanyahay isla markaana heysta hibo xariiftinimo oo fiican waxaa jira tababarro kala duwan oo loogu tala galay. Carruurta iskoolka waxey badanaa u baahan yihiin jawi iskool oo u wanaagsan aawtisimka iyo caawimaad dheeraad ah.

### *Qoraaga*

Eric Zander, PhD, dhakhat cilmi nafsi, Center of Neurodevelopmental Disorders at Karolinska Institutet (KIND), Lunds Universitet, Waaxda dhimirka ee carruurta iyo dhallinyarada, Machadka cilmiga daaweynta, BUP KIND Stockholms läns landsting, BUP Helsingborg Psykiatri Skåne, Region Skåne.

# Tixraac iyo magacyada bogag internetka ah

Autismspektrumtillstånd. Diagnostik och insatser, vårdens organisation och patientens delaktighet – En systematisk litteraturöversikt. (2013). Swedish Council on Health Technology Assessment.

American Psychiatric Association. (2013). Diagnostic and statistical manual of mental disorders (5 ed.). Arlington, VA: American Psychiatric Association.

Svensk översättning: Mini-D 5 Diagnostiska kriterier enligt DSM-5. Stockholm: Pilgrim Press.

Bölte, S., & Hallmayer, J. (2011). Autism Spectrum Conditions. FAQs on Autism, Aspergers Syndrome, and Atypical Autism Answered by International Experts. Commonwealth, MA, Göttingen, Germany: Hogrefe Publishing.

Lai, M. C., Lombardo, M. V., & Baron-Cohen, S. (2014). Autism. Lancet, 383(9920), 896-910.

World Health Organization [WHO] (1993). The ICD-10 classification of mental and behavioural disorders: diagnostic criteria for research. Geneva, WHO.

www.socialstyrelsen.se/klassificeringochkoder/diagnoskodericd-10/psykiatrikoder

www.ki.se/kind/start

www.barnsutveckling.se

www.autismforum.se